

Thi iyo Cindy waxay aad uga heleen gurigooda cusub ee ku yaal Elizabeth Street, Richmond.

### Dib-u-dejinta Richmond

Iyadoo ay ku dhawaad 90% dadka dib-u-dejinta loo sameynayay ay hadda guureen ama ay ku guda-jiraan howlihii guuritaanka, haddana saas ay tahay howlihii dib-u-dejinta waxay marayaan meel fiican iyadoona mardhow lasoo gebagebayn doono.

### Jadwalka dib-u-dejinta

139 Highett Street iyo meesha kor loogu socdo ee Elizabeth Street, Williams iyo Anderson Courts





### Nagu xirnoow

- Kulamada la isku xog wareysanayo
- Ra'yigii nalgula wadaagay kulamadii wadatashiga
- Isdiwaangeli si aad ula socoto wixii soo kordha

Si aad wax kasta ula socoto booqo:

[homes.vic.gov.au/richmond-precinct](https://homes.vic.gov.au/richmond-precinct)



nagala soco baraha bulshada raadi **Homes Victoria**

### Thi iyo Cindy

Thi iyo gabadheeda Cindy waxay ka guureen gurigoodii hore ee ku yaallay Elizabeth Street waxayna u guureen mid ka mid ah guryaha cusub ee Homes Victoria kuwaaso goobta ka ag dhow.

Cindy waxay ka hadashay sidii ay kooxda u qaabilsan dib-u-dejinta ay uga caawiyeen tallaabo kasta oo ay qaaday, laga bilaabo markii loo helay guri cusub oo ku yaal xaafada ay hada degan yihiin, markaas kabacdina la siiyay baakado ay alaabaha ku rartaan, kabacdina loo balamiyay kuwa dadka u rara alaabaha iyo sidoo kale in laga caawiyay sidii ay isaga tuuri lahaayeen alaabaha aysan u baahneyn.

"Caawintii aan ka helnay ayaa noo fududeysay howlaha guuritaanka."

Somali | Soomaali

Febraayo 2026



**DHISMAHA GURYAHA EE WEYN**

### Waxa ka socda goobta

#### Casriyeynta garoonka kubadda kolayga oo la ansixiyay

Casriyeynta garoonka ayaa la bilaabi doona

#### Dib-u-dejinta/guuritaanka marxalada koowaad ee dib-udhiska ayaa mar dhow dhamaan doona

Tiro aan badneyn oo qoysas meesha ku haray ah ayaa wali laga caawinayaa sidii ay u guuri lahaayeen

#### Rakibidda Mukeyfyada/qaboojiyayaalka

Waa la dhameystiri rabaa 112 Elizabeth Street iyadoo la bilaabay in guryaha mudnaanta leh ee 106, 108 iyo 110 Elizabeth Street la diyaariyo

### Richmond

Wixii ku soo kordhay Bulshada



# Dadkii oo guryaha dagaya ayagoo faraxsan

Muuqaalka gudaha guryaha cusub ee tayadoodu sarreyso ee ku yaal Elizabeth Street, Richmond



### Kiraystayaasha ayaa hada dib-u-dejin loo sameynaya

139 Highett Street iyo meesha kor loogu soconayo ee Elizabeth Street iyo Williams iyo Anderson Courts



### Taageerada loogu talagalay dadka kirada ugu jira guryaha ee dib-u-dejinta loo sameynayo

9-ka subaxnimo ilaa 5-ta galabnimo Talaado, Arbaco iyo Khamiis kasta  
112 Elizabeth Street

10-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha  
Xarunta Bulshada ee Waqooyiga Richmond ee ku taal 110 Elizabeth Street



106, 108, 110 iyo 112 Elizabeth Street



Dib u dhiska mustaqbalka



Rakibaadda qaboojiyaha/ mukeyfyada ayaa la wadaa



### Agagaarka xaafada



#### Casriyeynta amniga ayaa wali socota

- Casriyeynta kamarada CCTV waa la dhammeeyay
- Soo saarista furayaasha amniga ee cusub oo dhawaan la bilaabi doono ayaa la dhammaystiri doonaa sanadka 2026
- Tijaabinta albaabada amniga ee loogu talagalay meelaha dharka lagu dhaqdo ayaa la wadaa



#### Howlo shaqo oo la xiriirta tijaabada carrada

- Shaqaalaha ayaa bisha Febraayo goobta ku sugnaan doono si ay u calaamadeeyaan goobaha
- Laga bilaabo bartamaha bisha Maarso qeybo ka tirsan aagga ayaa silig lagu wareejin doonaa si loo sugo amniga



#### Dayactir lagu sameynayo garoonka lagu ciyaaro Kubadda Kolayga

- Dayactir lagu sameynayo garoonka kubadda kolayga ayaa dhawaan bilaabmi doonta
- Heer casriyeyn oo la tartami karta heer kasta ayaa la filayaa in la dhameystiro sanadka 2026 dhexdiisa



Meelaha kor loogu soconayo (walk up) ee Williams Court



#### Howlaha shaqo

- In la kormeero, lana sugo ammaanka guryaha laga guuray
- Waxyaabaha aan loo baahnayn in laga saaro guryaha laga guuray
- Nadiifinta dayrka dambe ee guryaha banaan
- Mashiino yaryar oo goobta yaal si loogu nadiifiyo isla markaasna looga saaro meesha xayndaabka ku wareegsan



Kaydin cusub ayaa dhawaan iman doonta!



147-161 Elizabeth Street  
144 guryo dowlad oo cusub iyo goobo bulsho



#### Kiraystayaasha u guuraya guryaha cusub

- Dadka ayaa sii wadi doona u guuritaanka guryaha cusub
- Gawaarida lagu guurayo ayaa laga yaabaa in la dhigto wadooyinka Elizabeth Street iyo Cooke iyo Lewis courts



Febraayo 2026

## Howlaha shaqo iyo xafladaha soo socda ee ka qabsoomi doona Richmond

Dhamaan shaqooyinka la qabanayo waxaa loo fulin doonaa heerarka ugu sarreeya ee amniga iyo shuruudaha sharciga.

### Waxaa laga yaabaa inaad aragto:

- Baabuurta xamuulka qaada oo alaabaha aan loo baahnayn ayaa saaraya guryihii bannaanaa
- Xoogaa shanqadh ah inta guryaha banaan baaritaan lagu sameynayo lana sugayo
- Baabuurta caasiyada ah ee lagu guuro ayaa la dhigayaa wadooyinka Elizabeth Street iyo Lewis Court iyadoo dadka guryaha degani ay u guurayaan guryo cusub
- Hawlaha nadiifinta iyadoona mashiino yar-yar ay ooli doonaan xeyndaabka gadaasheeda

### Wax howlo shaqo oo wax dumis ah ma dhici doonaan inta dhismayaalka la degan yahay.



Shaqada aan qabaneyno waxaa lagu hagaya saacadaha shaqada caadiga ah ee golahaaga:

**Isniin ilaa Jimce**  
inta u dhaxaysa 7-da subaxnimo iyo 6-da fiidnimo

**Sabti**  
inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimo iyo 3-da galabnimo

Dadka goobta degan ee u baahan macluumaad dheeraad ah ha la xiriiraan xafiiska guriyeynta ee dagaankooda:

1300 598 521

richmond.housing@dffh.vic.gov.au



Mararka qaar ogolaanshaha golaha ayaa loo baahan yahay si looga shaqeeyo wixii ka baxsan saacadahan balse waan la socodsiiin doonaa dadka goobta degan haddii ay taasi dhacdo.

## Jadwalka shaqo ee dhismaha inta aan la burburin

139 Highett Street iyo meelaha kor loogu soconayo ee Elizabeth Street iyo Williams iyo Anderson Courts

### Waan kuu joognaa

#### 1. Inaad wax badan ogaato oo ay waxkastana ammaan kuu ahaadaan

- Sugidda guryaha bannaan
- Kormeerista goobta iyo dhismayaasha si qalabka loogu maareeyo si amaan ah
- Joogtaynta dayactirka joogtada ah

### Bartamaha-2026

#### 2. Diyaargarowga

- Diyaarinayo goobta iyo calaamadaha wax haga/tilmaamaya si loo sugo ammaanka goobta
- Hubinta isku xirka adeegga
- Meesha laga galo in laga dhigo mid badbaado u ah dadka lugaynaya, baabuurta iyo baarkinka baabuurka
- Howlo shaqo oo laga wado gudaha dhismayaasha si looga dhigo meel ammaan ah looguna diyaariyo burburinta

### 2026

#### 3. Duminta

- Rakibaadda biraha wax lagu dhisayo (scaffolding)
- Waxa gudaha ku dhisan in lasoo saaro
- Dhismaha marka si taxadar leh oo tartiib-tartiib ah loo burburinayo
- Si joogto ah in bulshada loola socodsiiyo wixii soo cusboonaada



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan macluumaad ku qoran luqadaada booqo: [homes.vic.gov.au/information-in-your-language](https://homes.vic.gov.au/information-in-your-language)



Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:

enquiries@homes.vic.gov.au